



Wasaaradda Waxbarashada  
Federaalka ee Soomaaliya



Wasaaradda Waxbarashada  
Puntland ee Soomaaliya

**War murtiveedka Shirka Wadatashiga Wasaaraddaha Waxbarashada Federaalka Iyo  
Puntland Ee Soomaaliveed**

Taariikh: 5 - 9 Luuliyo, 2017

**Horudhac**

Maalinnimadii Arbacada ee taariikhdu ku beegnayd 05.09.2017 waxaa magaalada Garoowe ee caasimada Puntland soo gaaray wafdi uu hogaaminayo Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare ee Dawladda Federaalka Soomaaliya, Mudane Cabdiraxmaan Daahir Cismaan. Imaanshihii iyo soo dhowayntii wafdiga ka dib, waxaa warbixin kooban laga siiyo heerka waxbarasho ee Puntland, guulaha ay gaartay iyo qorshayaasha Wasaaradda Waxbarashada Iyo Tacliinta Sare ee Puntland, sidoo kale Wasiirku waxa uu booqday goobo waxbarasho oo kala duwan, kulan midaysana la qaatay maamulka Jaamacadaha kuyaal magaalada Garoowe, kulankaas oo ka dhacay Jaamacada *Puntland State University (PSU)*.

Waxaa si toos ah u bilowday wadatashi ku saabsan arrimaha waxbarashada dalka wuxuuna dhexmaray guddiyo farsamo oo matalayay Labada Wasaaradood. Wadahadalka waxaa saldhig u ahaa qodobdo aan weli ku qeexnayn Dastuurka Federaalka Soomaaliya ee qabyo qoraalka ah.

Qodobada laga wada hadlay waxaa ka mid ahaa afarta qodob ee hoos ku qeexan:

1. Dejinta iyo ansixinta qaab dhismeedka manhajka;
2. Dejinta iyo maamulida imtixaanaadka;
3. Bixinta iyo meel marinta shahaadada; iyo
4. Raadinta, helitaanka iyo qaybinta deeqaha waxbarashadda.

Wadahadal iyo wadatashi badan ka dib, qodobada lagu heshiiyay oo faah-faahsan waxaa ka mid ah:

MAN

#Md

### 1. Dejinta iyo ansixinta qaab dhismeedka manhajka

Labada Wasaaradood waxay wadatashigoodii ku qireen in Puntland ay leedahay qaab dhismeed manhaj dhammaystiran, midaysan kaas oo ka dhaqan galay dhammaan dugsiyada hoose/dhexe iyo sare ee ku yaal deegaanada Puntland. Sidoo kale labada Wasaaradood waxay qireen in la horumariyo waxbarashada gobolada kale ee dalka, hadii ay ahaan lahayd dhanka manaahijta iyo hirgelinta nidaam waxbarasho oo wanaagsan.

Maadama, dejinta qaab dhismeedka manhajku uu horay ugu soo socday habka Saddexda Aag (*Three Zones*), isla markaasna lagu kala horeeyo meesha maamul kasta wax marinayo, labada Wasaaradood waxay ku heshiiyeen in:

1. Wasaaradda Waxbarashada ee Dawladda Federaalka dhaqan galiso qaab dhismeedka manhajka ay gacanta ku hayso kaas oo aan saamayn ku yeelan doonin qaab dhismeedka manhajka iyo muqararka Puntland ee horay uga dhaqan galay deegaanada Puntland isla markaasna Wasaaradda Waxbarashada Federaalku ay aqoonsan tahay.
2. Puntland qaab dhismeedka manhajka ay leedahay dhaqan galiso inta laga dhamaystirayo Dastuurka qabyo qoraalka ah ee Federaalka kaas oo caddayn doona awoodaha heerarka maamul ee kala sareeya.
3. Labada qaab dhismeed ee manhaj inta badan isku mid yihiin ayna muhiim tahay in mustaqbalka laga fakaro suurta galnimada mideynta iyo horumarin inta ka harsan arimaha qaab dhismeedka manaahijta.

### 2) Dejinta iyo maamulida imtixaanaadka

Wasaaradda Waxbarashada Ee Dawladda Federaalka waxay bogaadisay kartida iyo hawl karnimada Dawladda Puntland ee u sahashay in ay qaado imtixaan midaysan mudo gaaraysa 15 sano kaas oo soo maray heerar kala duwan hadana gaaray in ay ku kalsoonaadaan, kuna qancaan dhammaan daneeyayaasha kala duwan ee waxbarashada Soomaliya.

Maadama qaadista imtixaan midaysan ee Soomaliya oo dhan ay tahay mid xasaasi ah, isla markaasna aynan suurto gal ahayn wakhtigan la joogo, sidaa darteed, labada Wasaaradood waxay ku heshiiyeen in:

1. Wasaaradda Waxbarashada Iyo Tacliinta Sare ee Puntland ay u madax banaanaato maamulka iyo qaadista imtixaanka midaysan ee degaanada Puntland.

MAN

2  
Md

2. Wasaaradda Waxbarashada ee Dawladda Federaalka Soomaaliya ay talo iyo taageero ku yeelato maamulka imtixaanka Wasaaradda Waxbarashada Iyo Tacliinta Sare ee Puntland.
3. Wasaaradda Waxbarashada Iyo Tacliinta Sare ee Puntland ay natiijada imtixaanka u gudbiso Wasaaradda Waxbarashada ee Dawladda Federaalka.
4. Laga wadatashado sidii loo horumarin lahaa imtixaanaadka Soomaaliya.

### 3) Bixinta iyo meel marinta shahaadada

Labada Wasaaradood waxay ka wadhadleen in Shahaadadu tahay arrin muhiim ah oo caddayn u noqonaysa aqoonsiga ardayga sida saxda ah u dhammaystirtay waxbarashada dugsiga sare isla markaasna diyaar u ah in uu waxbarsho u aado wadanka dibadiisa. Waxaa lagu heshiiyey qodobada hoos ku qoran in:

1. Loo baahan yahay Shahaado midaysan, uuna arday walba oo dhammaystay waxbarashada dugsiga sare isla markaasna ka heli karo xarunta dhexe ee Wasaaradda Waxbarashada Puntland.
2. Dawladda Federaalku aqoonsan tahay Shahaadada Puntland.
3. La horumariyo Shahaado midaysan gaar ahaan dhanka tayada, naqshadda, sugnaanta iyo macluumaadka ay xambaarsan tahay.
4. Lagu muujiyo goobta iyo dawlad goboleedka laga bixiyay.
5. Laga guuro habka gacan ku qoridda Shahaadada loona gudbo Tiknooloojida Casriga ah (Computerized).
6. Lagu daro maadooyinka ka maqan sida Siyaasada iyo Dawladda, Beeraha, Ganacsiga, IWM.
7. Ardayda loo fududeeyo helitaanka shahaadada iyagoo loogu adeegayo deegaankooda wakhti kooban.
8. Muddo bil gudaheed ah lagu dhiso guddi isku dhaf ah oo ka hawl gala horumarinta Shahaado midaysan, isla markaana Shahaadada cusubi ku hirgasho muddo lix bilood ah.

### 4) Raadinta, helitaanka iyo qaybinta deeqaha waxbarashadda

Labada Wasaaradood waxay ka arinsadeen raadinta, helitaanka iyo qaybinta deeqaha waxbarashada ee magaca Soomaaliya lagu helo. In lagu maamulo cadaalad iyo hufnaan deeqaha waxbarashada waa masuuliyad saaran cid walba oo ka shaqaysa waxbarashada ubadka Soomaaliyeed meel kasta oo ay joogaan. Labada Wasaaradood waxay ku heshiiyeen in:

1. Si wada jir ah la iskaga kaashado raadinta fursadaha deeqaha waxbarashada.

MAN



2. Qaybinta deeqaha waxbarasho lagu saleeyo tirada ardayda gashay imtixaanka dugsiga sare ee sanad dugsiyeedkaas.
3. Deeqdaha waxbarasho ee sida gaarka ah Puntland u hesho ay Wasaaradda Waxbarashadda Dawladda Federaalku aqbasho kuna taageerto.
4. Deeqaha waxbarasho ee ay hesho Wasaaradda Waxbarashada Dawladda Federaalku ay tixgaliso saamigii ay horay ugu lahayd Puntland.
5. Ardayda Puntland loo fududeeyo sidii ay u heli lahaayeen fursadaha waxbarasho ee Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed.
6. Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed ay farac ku yeelato Puntland si fursadaas uga faaiidaystaan ardayda Puntland.

### Gunaanad

Labada Wasaaradood waxay garwaaqsadeen in arrimaha waxbarashada loo baahan yahay in laga yeesho wadatashi iyo is afgarad joogta ah isla mar ahaantaasna la ilaaliyo midnimada ummadda Soomaaliyeed gaar ahaan ubadka oo ah kuwa sida tooska ah ay u saamaynayso go'aamada la xiriira waxbarashada. Sidoo kale waxay labada Wasaaradood isla garteen in wada shaqeynta iyo wada xaajoodyada waxbarashadu ay ku salaysnaadaan mabaadii'da aas-aasiga ah sida; istixgalin, wadaniyad, midnimo iyo ilaalinta maslaxadda iyo mustaqbalka ubadka Soomaaliyeed.

Saxiixayaasha iyo ansixinta heshiiska	
Magaca Masuulka: Maxamed Cabdulqaadir Nuur	Magaca Masuulka: Maxamed Cabdulqaadir Cismaan
Agaasimaha Guud, Wasaaradda Waxbarashada ee Dawladda Federaalka Soomaaliya	Agaasimaha Guud, Wasaaradda Waxbarashada & Tacliinta Sare ee Puntland Soomaaliya
Saxiix: 	Saxiix: 
Qodobada heshiiskan ku cadda waxaa ah: 	
Magaca Masuulka: Cabdiraxmaan Dahir Cismaan	Magaca Masuulka: Prof. Abshir Axmed Yuusuf Cilac
Wasiirka Waxbarashada, Hiddaha & Tacliinta Sare Ee Dawladda Federaalka Soomaaliya	Wasiirka Waxbarashada & Tacliinta Sare Ee Puntland Soomaaliya
Saxiix: 	Saxiix: 
	

—DHAMMAAD—

MAN

Ad